7. Qoolo oo isla degan waa maxay?

Qoolada isla degan waa meel oo lagu talgalay inay caruurta iyo dhalinyarada hoy u noqoto, waxay na ka soo jeedaa xafiiska arimaha dhalinyarada. Halkaan waxaa ku wada nool dhalinyaro iyo waxaa caawinaayo xirfadlayaal. Meeshaas waxaa lagaa sinayaa cunto, dharr iyo qol aa degtid. Mararka qaarkood qoolooyinka isla degan waxaa la dhahaa xaruunta xanaaneenta caruurta ama xaruun.

8. Qoyska xananeenta waa maxay?

Haddii aad jaceshahay in einer qoys ku noolaatid, waa inaa u sheegtid xafiiska arimaha dhalinyarada. Markaas oo kale waxaa lagu raadinayaa qoys ku aanfaco. Qoyskaas waxaa la dhahaa qoyska xannaneenta. Wax fudud ma ahaan in laguu helo qoyska xananeenta adiga ku anfaco. Waxaa dhici karo in laguu heli wayo qoys xananeen.

9. Dadka isla wada degan oo la daryeelo waa maxay?

Meesha la wada degan yahay oo la daryeelayo waa guri oo aad lagu la dejinaayo dhalinyaro kale ama aad keligaa degantahay. Gurigaas oo kale daryeelayaal oo maalinta oo dhan joogaan ka ma jiraan. Ku dhowaad wax kasta waa inaa keligaa qabsatid iyo waa inaa u dhaqmatid qof qaangaarey oo kale. Laakiin waxa laguu qabanayaa hal daryeele, oo aad wada kulmi kartiin. Daryeelaha markaas oo kale n yar uu ku caawin karaa.

10. Caawimaadda ee soo korinta oo aan ahayn meel joogto ah waa maxay?

Waxaad la nooshahay qaraabadaada iyo waxaad u bahaantahay daryeel. Caawimaadda ee oo koorinta waxa gurigaada kugu imaanayo qof ay shaqada social-ka xirfaddiisa tahay iyo kaa caawinaayo meesha aad joogtid. Shaqaalaha social-ka wuxuu kaa cawin karaa / waxay kaa caawin kartaa dhibaatooyin kala duwan. Tusaale ahaan markii aa qabtid dhib ku saabsan qoyska ama dugsiga ama haddii aad dabe-ecaddaada bedeli rabtid.

11. Waxaad dhibaato ku qabtaa xafiiska arimaha dhalinyarada. Yaad la hadli kartaa?

Markii ugu horeyso si toos ah xafiiska arimaha dhalinyarada la hadal. Waxaad tagi kartaa xafiiska ay caruurta iyo dhalinyarada ka dacwooni karaan. Taas waxaa dheer inaa u tagi kartid garyaqaan.

Qofka xiriiriyaha ah ee gobolka Rheinland-Pfalz

Liiska xafiisyada arimaha dhalinyarada ee gobolka Rheinland-Pfalz
https://lsjv.rlp.de/fileadmin/lsjv/Dateien/Aufgaben/Kinder_Jugend_Familie/Adressen/Jugendaemter_rlp.pdf

Xafiiska dacwada ee caruurta iyo dhalinyarada
Kaiserstraße 32 | 55116 Mainz
Teleefoonka 06131 28999-51
ama 0172 7178723 ama WhatsApp
beschwerdestelle@diebuergerbeauftragte.rlp.de
www.diebuergerbeauftragte.rlp.de

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xafiiska arimaha dhalinyarada
www.unterstuetzung-die-ankommt.de

RheinlandPfalz
LANDESAMT FÜR SOZIALES, JUGEND UND VERSORGUNG

Xaruunta aqoonta ajanabiga qaangaarin aan lala soconin
Rheinallee 97-101
55118 Mainz
www.lsjv.rlp.de

Tariiqda la sameeyey: September 2018

Caddeynta sawirrada: © cienpiesnf – Fotolia.com

RheinlandPfalz
LANDESAMT FÜR SOZIALES, JUGEND UND VERSORGUNG

WAXAAD KELIGAA TIMID JARMALKA

Yaa kaa xannaanaya hadda?

Macluumaad ku saabsan hoyga, daryeelka iyo xanaanada ajanabiga qaangaarin oo waalid la´aan ku jooga gobolka Rheinland-Pfalz.

KU SOO DHOWOW GOBOLKA RHEINLAND-PFALZ!

Hallo, أَلسَّلَامُ عَلَيْكُمْ, Maalin Wanaagsan, سلام, bonjour, ሰላም, welcome!

Jarmalka waxaad timid bilaa waalidiin iyo adiga oo 18 sano ka yar. Waxaa laga yaabaa inaad is weydiineysid nolosha sidii ay u sii socon doonto. Xafiiska arimaha dhalinyarada waa inuu sidii sharciga Jarmalka waafaqsan caruurta iyo dhalinyarada hoy siiyo, daryeelo iyo xanaaneeyo.

Waxaa laga yaabaa inaad su´aalo badan qabtid oo ku saabsan xafiiska arimaha dhalinyarada. Xafiiska arimaha dhalinyarada sidoo kale wuxuu qabaa su´aalo uu ku weydiin rabo. Wargelintaan waxay kaga caawineysaa inaad fahantid, siduu xafiiska arimaha dhalinyarada ku cawinaayo iyo wixii ku sugaayo. Waxaa laguu sharaxayaa xuquuqdaada iyo waajibaadka ku saaraan iyo waxaa lagaa jawaabi doonaa su´aalaha ugu muhiimsan.

1. Maxaa dhacaya imaanshahaada kadib?

Markii aad imaatid kadib marka kowaad meesha aa joogtid waxaa ku caawinaayo xafiiska arimaha dhalinyarada. Caawimaadda xafiiska arimaha dhainyarta waxay u qaybsan tahay 3 tallaabo:

Tallaabo 1 – Hoyga ku meel gaar ah
Xafiiska arimaha dhalinyarada wuxu baarayaa, qofka aad tahay, da´daada iyo inaa cafimaad qabtid iyo in kale. Waxaad u sheegi kartaa qof ka socdo qoyskaaga inuu Jarmalka joogo iyo in kale. Adiga iyo qoyskaaga waa la isu keeni karaa. Xafiiska arimaha dhalinyarada oga waran inaad walaalahaada ama saxiibadaada la timid iyo in kale. Haddii aad rabtid waa la joogi kartaa. Jarmalka qaxootiga dhammaantooda waxa sii oo siman lagu qaybiyaa magaalooyinka iyo tuulooyinka. Goobta laguu qaybiyoo ma dooran kartid. Xafiiska arimaha dhalinyarada wuxuu baarayaa, adiga sidoo kale goob kale in lagu geyn karo iyo in kale. Waxaa laga yaabaa inaad joogeynin meesha aad hadda ka soo gashay.

Tallaabo 2 – Nidaamka Clearing-ka
Waxaa lagu la dejinayaa qoolo oo ah caruur iyo dhalinyaro. Maddaam aad bilaa waalidiin Jarmalka ku joogtid, waxaa ku caawinaayo xafiiska arimaha dhainyarta iyo wakiil sharciyeed. Masuulka waxaad ka wada hadleysiin sharcigaada joogitaanka ee Jarmalka. Xafiiska arimaha dhalinyarada sidoo kale wuxu baarayaa, caawimaadda aad u bahaantahay. Taas waxaad u sameyneysiin wadahadal oo ku saabasan qorshada caawimaadda. Hadda ama ugu dambeyn markii la gaaro tallabada 3aad waxaad bilaabi kartaa dugsiga.

Tallaabo 3 – Ogolaashaha caawimaadda
Xafiiska arimaha dhalinyarada waxaad ka heleysaa caawimaadda ku haboon. Caawimaadda waxay kuu sii diyaarineysaa, inaa markii dambe keligaa is dabiri kartid. Dugsiga kadib waxaad sameyn kartaa tababar xirfadeed, waa shaqeyn kartaa ama waxaa dhigan kartaa jaamacad. Noloshaada ee Jarmalka waxaa muhiim u ah inaad luqadda baratid. Sida caadiga ah caawimaadda xafiiska arimaha dhalinyarada waxay joogsaneysaa, markii aad 18 sano noqotid.

Caawimaad dheeraad ah haddii aad oga bahantahay xafiiska arimaha dhalinyarada, waa inaa arji u qorotid xafiiska arimaha dhalinyarada. Taas waxaa kaga caawin karaan wakiilkaaga, daryeelahaaga ee qoolada aad la degantahay ama xafiiska arimaha dhalinyarada.

2. Waa maxay xafiiska arimaha dhalinyarada iyo muxuu qabtaa?

Gobol kasta ee Jarmalka waxaa jiro xafiis dowladeed oo la dhaho xafiiska arimaha dhalinyarada. Xafiiska arimaha dhalinyarada wuxu ka shaqeeyaa inay caruurta, dhalinyarada iyo qoysaska fiican yihiin. Sidaas awgeed xafiiska arimaha dhalinyarada wuxu sameyaa la-talin, daryeel iyo tallaabooyin ee caawimaadda. Wuxuu kale ka shaqeeyaa inuu caruurta iyo dhalinyarada qatar ka ilaaliyo. Xafiiska arimaha dhalinyarada waxaa ka shaqeeyaan dad ay xirfadooda tahay shaqada social-ka. Haddii aa dhibaato qabtid, xataa haddii tahay dhibaato aad u weyn, waxaad oga la hadli kartaa xafiiska arimaha dhalinyarada iyo waxaad ka heli kartaa caawimaad.

3. Waa maxay hoyga?

Xafiiska arimaha dhalinyarada hadduu cunug ama dhalinyaro hoy siiyo, waxaa la dhahaa hoyga. Taas waxaa la sameynayaa tusaale ahaan, haddii aad keligaa Jarmalka imaatay iyo aad meeshaan guri ku lahayn aad ku seexan iyo ku noolaan kartid. Jididka banaanka in lagu noolaado waa qatar iyo u ma ficno caruurta iyo dhalinyarada. Xafiiska arimaha dhalinyarada waa inuu ku caawiyo. Sidaas darteed waxaa laguu geynayaa qolo aad la degayso ama qoys aad xanaano ka heleyso. Intaas waxa dheer waxa ka wada hadlaaysiin adiga iyo xafiiska arimaha dhalinyarada.

4. Waa maxay qofka masuulka ah?

Jarmalka waxaa jiraan arimo badan aa keligaa go´aan ka gaari karin, haddii aad ka yar tahay 18 sano. Sida caadiga ah go´aanadaas oo kale waxa ku gaarayo waalidiintaada. Waalidiintaada haddii san awoodin ama haddii aa keligaa tahay, waxaa waajib ah in wakiil sharciyeed lagu dalbo. Wakiilkaaga waxa la dhahaa masuulka. Xafiiska arimaha dhalinyarada iyo maxkamadda aa kuu helayaan wakiil. Adiga iyo wakiilkaaga si joogto ah aa isku imaaneysiin. Dantaada waa muhiim iyo masuulkaaga waa inu taas kaa dhageysto iyo waa inii go´aano gaaraan oo adiga kuu fiican. Tusaale ahaan waxaa wada go´aan ka gaareysiin, inaa magangeliyo codsan rabtid iyo in kale iyo goorme aad codsan rabtid.

5. Waa maxay wadahadalka oo ku saabasan qorshada caawimaadda?

Waxaa la sameynayaa wadahadal oo ka dhexeeyo xafiiska arimaha dhalinyarada, wakiilkaaga, daryeelahaaga ee qoolada aad la degantahay iyo adiga, oo laga hadlaayo caawimaadda aad uu bahaantahay nooceedu iyo meesha laga helaayo. Wadahadalkaas waxaa la dhahaa wadahadalka oo ku saabasan qorshada caawimaadda. Xafiiska arimaha dhalinyarada waa inuu wax kasta kuu sharaxo iyo inu ku la taliyo caawimaadda ku haboon. Waxaad sheegi kartaa, adiga wax muhiim kuu ah. Wadahadalka ra´yigaaga waa muhiim. Xafiiska arimaha dhalinyarada waa inuu masuulkaaga iyo adiga idin dhageysto.

6. Daryeelka aad ka heli kartid xafiiska arimaha dhalinyarada waa maxay?

Noocyada daryeelka xafiiska arimaha dhalinyarada oo lagu talgalay caruurta iyo dhalinyarada way kal duwan yihiin. Tusaalooyin yar waa kuwan:

- Waxaad la wada noolaan kartaa qolo, qoys ku xanaaneynaayo ama dad isla wada degan oo la daryeelo iyo adiga laguu caawinaayo.
- Sidoo kale waxaad heli kartaa caawimaad ee soo korinta oo aan laga helenin meel joogto ah.